



## Xogta Covid-19 ee dadka ku jooga Australia dalku galka (visaha) ku meelgaarka ah

Hadda oo taariikhdu tahay 4/04/2020

Dowlad Australia waxay ku dhawaaqday isbedelo khuseeya dadka haysta visaha ku meel gaarka ah. Hadafka is bedelkani waa ilaalinta caafimaadka bulshada, u badbaadinka bulshada fursadaha shaqooyinka, taageerida ilaha wax soosaarka ee muhiimka ah, iyo taageerada sidii degdeg looga soo kaban lahaa marka laga gudbo aafada cudurka Coronavirus.

Dadka haysta visaha ku meel gaarka ah waa in ay u hogaansamaan talo bixinta hayadaha caafimaadka ee ku saabsan Covid-19.

### Dadka shaqeeya iyagoo fasax (holiday) ku jooga wadanka:

Isbedelada holiday visaha wuxuu taageerayaa qaybaha muhiimka ah sida caafimaadka, daryeelka dadka da'da ah iyo dadka laxaadka la, shaqada beeraha, soosaarida cunada iyo daryeelka caruurta.

- Haddii aad haysato holiday visa oo aad ka shaqaysid mid ka mida qaybaha muhiimka ah, waxaa lagaa dhaafayaa in aad lix bilood u shaqayso qof qudha, waxaad xaq u leedahay in lagu siiyo vise cusub oo aad kaga sii shaqayso qaybaha muhiimka ah ee aad ka shaqayso, haddii visahu kaa dhacaayo lixda bilood ee soo socota.

Haddii aad haysato holiday visa oo aanad haysan dhaqaale aad ku noolaato inta aad joogto Australia waa in aad isu diryaarisaa sidii aad wadankaagii ugu noqonlahayd.

### Shaqaalaha xiliyada

Barnaamijka shaqaalaha xiliyada iyo qorshaha shaqaalaha ka soo jeeda bada pacifiga waxaa loo ogolaanayaa in ay kororsadaan joogitaankooda Australia si ay uga shaqeeyaan shaqooyinka beeraha.

Haddii aad joogto Australia oo aad ka qaybqaadato shaqooyinka xiliyada waxaad codsan kartaa visaha noociisu yahay (subclass 403) qorshaha visaha xoogsatada ka soo jeeda bada pacifiga.

### Dadka haysta visaha booqashada (holiday visa)

Haddii aad joogto Australia oo aad haysato holiday visa oo aadan awoodin in ku noolaato Australia durufo dhaqaale awgood, waa in aad ku noqotaa dalkaagii haddii ay suuro galtahay.

### Ardayda Caalamka ka timaada

Waxaa lagu dhiigigelinayaa ardayka caalamka ka timaada in ay ku tiirsanaadaan taageerada qoysaskooda, shaqooyinka maalinlaha ah haddii ay helaan iyo kaydhooda lacageed si ay ugu noolaadaan Australia. Marmarka qaarkood ardaydu waxay qaadan karaan kaydhooda lacageed ee howlgabka.

Dowladu waxay kaloo hogaanka u dabcinaysaa shuruudaha la xiriira visaha ardayda iyadoo dawladu eegayso in aafada Caronavirus is hortaagtay in ay fulaan shuruudihii ku xidhaa visaha ardayda.

### Dadka haysta visaha xirfadlayda aan joogtada ahayn

Haddii aad haysato visaha xirfadlayda aan joogtada ahayn oo shaqada lagaa joojiyey laakiin aan lagaa eryin shaqada, visahaaga waad haysan kartaa, ganacsataduna waxay heli doonaan fursad

ay kuugu kordhiyaan wkhtiga visha sidii hore heshiiku u ahaa. Dowladuna waxay kuu ogolaanaysaa in aad qaadata ilaa \$10,000 oo kamida lacagtaada howlgabka si'aad ugu noolaato.

Ganacsatanu waxay awoodaan in ay dhimaan saacadaha aad shaqayso iyadoo aan adiga iyo ganacsadaha aad u shaqayso midkiina ku xad gudbin waajibaadka iyo shuruudaha ku xidhan visahaaga.

Haddii shaqada lagaa eryey waxaad u baahantahay in aad hesho shaqo kale mudo 60 casho gudohood ah ama waa inaad diyaarisaa sidaad wadanka uga bixilahayd meeshii ay suuro gal ka tahay.

Wixii xog dheeraada ee ku saabsan hishiishyadan ku meelgaarka ah waxaad ka helikartaa wasaarada webside keeda <https://covid19.homeaffairs.gov.au>